


Sidii aad isu diiwaanglin lahayd si aad u codeysid

Tuse akhriskiisu fudud yahay



Enrol

Sidii aad u isticmaali lahayd tusahan



Golaha Doorashada Australia (AEC) ayaa qoray tusahan. Markaad aragtid erayga 'anaga' micnahiisu waa AEC.



Waxaan u qornay tusahan si sahlan oo la akhrin karo.

Waxaan isticmaalnaa sawiro si aan ugu sharaxno fikradaha qaar.



Waxaan ku qornay erayada qaar qoraal **madow**. Waxaan sharaxnaa micnaha erayadan. Waxaa jira liis erayadaan ah bogga 16-naad.



Waxaad weydiisan kartaa caawimaad si aad u akhrisid tusahaan.

Saaxiib, xubin qoyska ah ama qof ku taageera ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo.

Maxaa ku jira tusahan?

Codeynta doorashada	4
Isu diiwaangelinta si aad u codeysid	6
Maxaa xiga oo dhacaya?	12
Ka waran hadii aad ka guurto guriga?	13
Horay ma ugu jirtay diiwaanka doorashada?	14
Sidee baad ku heli kartaa macluumaad dheeraad ah?	15
Liiska erayada	16
Nagala soo xiriir	17


Codeynta doorashada



Australia gudaheeda waxaan leenahay **doorashooyinka dawlada dhexe** qiyaastii 3-dii sanaba.



Doorashada dawlada dhexe waxaa loogu talagalay dalka oo dhan.



Waa sidaan u doorano dawlada Australia.



Xeer ilaaliyaha Guud ayaa go'aamiya taariikhda doorashada.

Maalinta doorashadu waxay noqoneysaa Sabti.



Maalintas, dadka Australian ka ahi way **codeynayaan**.

Markaad codeeyso, waxaad ka caawineysaa doorashada qofka qayb ka noqonaya dawlada Australia.



Waa inaad codeysaa haddii aad:

- **Muwaadin** australiyaan ah tahay oo
- aad jirto 18 sanno ama ka weyn.



Muwaadin waa qof la siiyey xuquuqda iyo xoriyada dalka meeshay ku nool yihiin.



Codeeyntu waxay kuu ogolaanaysaa inaad wax ka go'aamiso cida maamuleysa dalkeena.



Ha welwelin hadii aadan hore u codeyn.




Waan kuu sharaxeyna waxaad u baahan tahay inaad sameysid.

Isu diiwaangelinta si aad u codeysid



Ka hor intaadan codeyn, waa inaad **is diiwaangelisaa**.



Markaad is diiwaangelisid, waxaan magacaaga ku dareena liiska **codbixiyayaasha** - dadka codeen kara.

Liiskan waxaa la yiraahdaa **diiwanka doorashada**.




Si aad u gashid diiwaanka doorashada, waa inaad buuxisaa foomka doorashada.

18+



Hadii aad gaari rabto 18 sano, hada waad isdiiwaangelin kartaa.

Markaad 18 noqotid, waxaad diyaar u ahaan doontaa inaad codeysid.



Waxaad buuxin kartaa foomka codeenta:

- online
- warqad.



Waad is diiwangelin kartaa si aad u codeysid wakhti kasta.

Laakiin waa inaad is diiwaangelisaa ka hor intaan diiwanka doorashadu xirmin si aad u codeyso doorashada.



Diiwaanka doorashadu wuxuu xirmayaa 1 toddobaad ka dib marka Xeer Ilaaliyaha guud uu go'aamiyo taariikhda doorashada.



Hadii aad is diiwaangeliso ka hor intuuusan xirmin diiwaanka doorashadu, ma gefi doontid.

Iska diiwaangelinta online



Waxaad booqan kartaa website keena si aad iskaga diiwaangelisid inaad online ku codeyso.

www.aec.gov.au/enrol

Waxaa jira baton oranaya: Enrol online (iska diiwaangeli online).



Waxaad u baahan doontaa inaad ka jawaabtid su'aalo yar.



Waxaa lagu weydiin doonaa inaad **cadeyso** qofkaad tahay, sida:


- laysanka darawalka
- baasaboorka.



Qof kale oo ku jira diiwaanka doorashada ayaa sidoo kale xaqiijin kara inay ku yaqaanaan.



Hadii aad dooneysid, waxaad weydiin kartaa qof inuu ku caawiyo.



Markaad dhameyso, waxaad u baahan tahay inaad isticmaashid batoonka leh: Submit (Dir).

Isku diiwaangelinta warqadaha



Si aad isugu diiwaangelisid warqad, waxaad u baahan tahay inaad buuxisid foomka is diiwaangelinta.



Waxaad ka heli kartaa foomka is diiwaangelinta xafiis kasta ee AEC.



Hadii aad na soo wacdid, waxaan kuugu soo diri karnaa foomka is diiwaangelinta boostada.

Lambarkeenu waa **13 23 26**



Waxaad u baahan doontaa inaad ka jawaabtid su'aalo yar.



Waxaa lagu weydiin doonaa inaad cadeyso qofkaad tahay, sida:


- laysanka darawalka
- baasaboorka.



Qof kale oo diiwaanka doorashada ku jira ayaa sidoo kale cadeyn kara inay ku yaqaanaan.



Hadii aad dooneysid, waxaad weydiin kartaa qof inuu ku caawiyo.



Markaad dhameysid, waxaad u baahan tahay inaad noo soo dirtid foomka.

Waxaad sameen karta:

- Inaad noogu soo dirto boostada.



AEC

Reply Paid 9867

Magaala madaxda aad degan tahay


Uma baahnid inaad istaambo

isticmaashid



- Gee xafiiska AEC
Hadii aad na soo wacdid, waxaan kaa caawin karnaa inaad heshid xafiiska AEC ee kuugu dhow.

13 23 26



- Iskaangaree oo ku soo rid website keena.

www.aec.gov.au/return

Maxaa xiga oo dhacaya?



Dhowr isbuuc ka dib markaad is diiwaangelisid, waxaan kuu soo diri doonaa warqad.




Warqadu waxay ku oran doonta in magacaaga lagu daray diiwaanka doorashada.



Tan micnaheedu waxaa weeye waad codeen kartaa doorashada dawlada dhexe.

Ka waran hadii aad ka guurto guriga?



Waxaad u baahan tahay inaad noo sheegto mar kasta oo aad guurto.



Tani waxay naga caawineysaa in diiwaanka doorashadu yahay mid sax ah.



Haddii aad u guurto guri cusub, fadlan buuxi foom cusub oo is diiwaangelineed.

Horay ma ugu jirtay diiwaanka doorashada?



Waa fudud dahay inaad jeegareysid haddii aad horay ugu jirtay diiwaanka doorashada.

Waxaad sameen karta:



- booqo website keena
www.aec.gov.au/check



- Taleefan noo soo dir waanu kuu jeegareynaynaa
13 23 26



- Booqo xafiiska AEC waana kuu fiirineyna.

Sidee baad ku heli kartaa macluumaad dheeraad ah?



Hadii aad dooneysid inaad heshid xog dheeraad ah oo ku saabsan codeenta, waxaan haynaa laba tuse oo kale oo aad akhrin kartid:

- *Sidii aad uga codeen lahayd goobta codeenta*
- *Sidii aad uga codeen lahayd goobta codeenta.*



Waxaad ka heli kartaa tusayaashan website keena.

www.aec.gov.au/assistance




Waxaan sidoo kale idiinkugu heynaa macluumaad website keena dadka ku hadla luuqado aan ahayn Ingiriiska.

Liiska erayada



Muwaadin

Muwaadin waa qof la siiyey xuquuqda iyo xoriyada dalka meeshay ku nool yihiin.



Diiwaanka doorashada

Liiska dhamaan cod bixiye yaalka.



Isdiwaangeli

Markaad is diiwaangalisid, waxaan magacaaga ku dareynaa liiska cod bixiye yaalka.



Doorashada dawlada dhexe

Doorashada dawlada dhexe waxaa loogu talagalay dalka oo dhan.

Waa sidaan u doorano dawlada Australia.



Codee

Markaad codeeyso, waxaad ka caawineysaa doorashada qofka qayb ka noqonaya dawlada Australia.



Cod bixiyeyaalka

Dadka codeyn kara.

Nagala soo xiriir

Adeega Tebinta Qaranka (NRS)



Isticmaalayaasha TTY:

- Wac 13 36 77
- Weydiiso 13 23 26



Hadal oo dhageyso isticmaalayaasha:

- Wac 1300 555 727
- Weydiiso 13 23 26



Isticmaalayaasha tebinta interneetka:

- Ku xir NRS
- Weydiiso 13 23 26



Luuqadaha kale:

- Wac 1300 720 153



www.aec.gov.au



[/AusElectoralCom/](https://www.facebook.com/AusElectoralCom/)



[@AusElectoralCom](https://twitter.com/AusElectoralCom)



[@auselectoralcom](https://www.instagram.com/auselectoralcom)



Kooxda Isticmaalka Macluumaadka waxay daabaceen tusahan sida sahlan loo akhrin karo iyagoo isticmaalaya muuqaalo sawiro u gaar ah. Muuqaalada waxaa laga yaabaa inaan dib loo isticmaali ogolaansho la'aan. Wixii weydiimo ah oo ku saabsan, muuqaalada, fadlan booqo.

www.informationaccessgroup.com.

Sheeg lambarka shaqada 3035-A.

Waxaa Idmay Ku xigeenka Guddoomiyaha Doorashada, Canberra.